



INDEPENDENT ELECTORAL DISPUTE RESOLUTION MECHANISM

Ref: GMXKHD/XG/ 00 38

Date: 24 / 12 /2016

Warsaxaafadeed

1. Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka Dadban waxaa uu ugu horeyn halkaan mahadballaaran ugu soo gudbinayaa dhamaan qeybaha kala duwan ee Bulshaweynta Soomaaliyeed oo ay uga horeeyaan MHQ, Odiyaasha dhaqanka, Samadoonada, Ergadii codeysay iyo Ciidamada Amaanka iyo AMISOM kaalintii ay ku lahaayeen qabsoomidda Doorshada dadban muddo 47 sano ah kadib. Sidoo kale Waxaa uu guddigu u mahadcelinayaa Beesha Caalamka oo laheyd kaalinta fududeynta, la talinta iyo gacansiinta Guddiga Madaxdabanaan ee Xallinta Khilaafaadka iyo Guddiyada Doorashada GFHDD iyo GDGHDD.
2. Guddigan ayaa waxaa lagu magacaabay laguna ansixiyay xubnihiisa go'aanadii kasoo baxay MHQ ee ku taariikheysnaa **6-14 –September 2016** iyadoo guddigan si gaar ah ugu xilsaaranyahay xallinta khilaafaadka iyo muranadda kadhasha doorashooyinka dadban ee 2016 keliya. Guddi howleedyo kamid ah GMXKHD ayaa waxa ay kahowlgaleen dhamaan caasimadaha deegaan doorashooyinka Dowladd Gobaleedyada (**Puntland, Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug, Hirshabelle iyo Caasimadda Muqdisho**), **22 October 2016**, iyadoo xilligaa inta badan Dowladd Gobaleedyadu ka socdeen soo xulidda iyo Diiwaangelinta ergooyinka dooranayo kuraasta aqalka hoose ee Golaha Shacabka, xiligaa oo ay cabasho badan qabeen murshaxiinta, Odiyaasha dhaqanka, Samadoonada, Ergooiyo yinka Beelaha qaarkood.
3. Mudadaa kooban ee uu jiray Guddigu waxaa uu qabtay howlo adag oo ballaaran oo isugu jiray wadhadashiin, isu keenid iyo talasiin shakhsiyaadka wax kala tabanayo ka hor intaysan howshoodu noqon dacwa qaadis iyo xallin khilaafaad.



Dacwooyinka soo gaaray guddiga ee soo maray habraaca xallinta khilaafaadka ayaa ahaa 71 dacwodood, dhamaan cabashooyinka ayaa isugu jiray kuna qotamay qeybahan kala duwan oo kala ah:

1. Isdaba marin liiska Ergooyinka
 2. Musuq, cod gadasho lagu sameeyay ergada
 3. Kutagrifal Awoodeed oo ku aadan asteynta kuraasta qoondada haweenka
 4. Dacwo ku qotanta kursi laga duudsiiyay jufadii laheyd
 5. Murshaxiin loo diiday shaadooyinkii iyo ka qeybgalka doorashada.
4. Dhmaan dacwooyinkan oo ay soo gudbiyeen Murashaxiin iyo Odiyaal dhaqan oo kamid 135 ta saxiixayaasha ah ayaa guddigu waxuu mariyay habraaca xallinta khilaafaadka oo ah dhageysiga iyo ka baaraandegidda Documentiyada ay soo gudbiyeen dacwoodayaasha iyadoo sidoo kalane guddigu uu sameynayay baaritaano iyo xog wareeysiyo gaar ah oo uu la yeelanayay dhamaan dhinacyada ay khuseeyo iyo dad ka madaxbanaan si loo gaaro xaqiiqada dhabta ah iyo cadaaladda.
5. Fadhiyo iyo doodo dhaahdheer oo lagu fallanqeynayey go'aannona looga gaarayey cabashooyinka ayaa wuxuu guddigu si horudhac ku soo koobay 21 kiis dacwodood oo intooda badani u baahnaa caddaymo dheeri ah iyo waraysi shakhsiyaad gobollada laga keeno. Intaas markii la suurtoogeliyay, Guddigu wuxuu kiisaskaas 21-ka ahaa ka soo reebay **11 kiis** oo uu Guddigu u aqoonsaday in dib doorasho loogu celiyo loona tartamo.
6. Waxaa xusid mudan inuu Guddigani arrimahaas oo dhan kulammo kala yeeshay **Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaranka** uuna ka siiyay sharraxaad iyo xogwarran buuxa kiisaaska 21-ka ahaa oo dhan.
7. Sidaa si lamid ah waxaa uu Guddigu dhowr jeer la kulmay Beesha Caalamka ugana warbixinayey hadba meesha ay wax marayaan ee ku aadan geedi socodka doorashooyinka iyo xallinta cabashooyinka soo gaaray Guddiga. Kullankii ugu danbeyay ayaa Guddigu waxuu faah faahin kasiiyay Beesha Caalamka kiisaska 11 ahaa iyo waxyaabaha uu u cuskaday



go'aan ka gaariddoda. Sidoo kale waxaa xusid mudan in dhamaan kulamadii guddigu uu ku falanqeynayay dacwooyinka laguna gaarayay go'aanda goob joogka ahaayeen xubno kawakiil ah Beesha Caalamka.

8. Haddaba, iyadoo uu Guddigani dedaal dheeraad ah sameeyay, xilkii loo igmadayna uu sii hufan u gutay, wuxuu si weyn uga xun yahay in laga faafiyay warar aan sal iyo raad toona lahayn, oo ay dabada ka riixayaan shakhsiyaad dano gaar ah leh oo u gudbinaya warar aan xaqiiqo aheyn Beesha Caalamka iyaduna aysan hubaal iyo habsiino dheeri ah ku sameynin xaqiiqda eeydeymaha iyo dhaleecooyinka loo soo jeediyay Guddigan.
9. Ugudanbeyn Guddigu waxaa uu ugu baaqayaa MHQ, Dhamaan qeybaha kala duwan ee Bulshada Soomaaliyeed, iyo Beesha Caalamka in si wada jir ah la isaga kaashado dhameystirka hanaanka doorashooyinka dadkaban iyo ka gudbinta dalka xaaladda kala guurka si nabad ah.
10. Guddigu waxuu baaq caalami ah u dirayaa dhamaan dadka soomaaliyeed ee Illaahay waxsiiyay iyo deeq bixiyayaasha Dowladaha Carabta, Islaamka iyo Caalamkaba in ay si deg deg ah loogu gurmado dadka soomaaliyeed ee Abaaruhu saameeyeen.

Wabillahi Toowfiiq

***Guddiga Madaxdabanaan ee Xallinta Khilaafaadka
Doorashooyinka Dadban 2016***

